

Guddiga Maamulka Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban

Kulanka 52aad ee 08ka Juunyo 2021

Bangiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha: Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa uga warbixiyay kulanka daah-furka Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka, kaasoo wajigiisa koowaad lagu bilaabay sideed bangi oo dalka ka jira. Nidaamku waxuu udub dhexaad u yahay bixinta lacagaha ka dhexeeya bangiyada, waxayna u oggolaaneysaa Bangiga Dhexe inuu si wanaagsan u nidaamiyo waaxda bangiyada. Guddoomiyaha ayaa sidoo kale uga warbixiyay kulanka dadaalada dib loogu soo celinayo hantida qaran ee taala Bangiyada Talyaaniga iyo Ingiriiska, iyo u diyaar garowga dib u habeynta Shilin Soomaaliga oo ay taageerayaan Bangiga Aduunka iyo saaxiibada kale ee Soomaaliya.

Arrimaha Batroolka iyo Gaaska: Wasiirka Wasaaradda Batroolka Md. Cabdirashiid Maxamed, Ku-simaha Guddoomiyaha ahna Agaasimaha Guud ee Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed iyo kooxahooda farsamada ayaa ka soo qaybgalay kulanka. Wasaaradda Maaliyadda Wasaaradda Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta waxay si dhow uga wada shaqeynayaan xallinta arrimaha taagan ee ku saabsan Heshiiska Waxsoosaar Wadaaga iyo borotokoolka rukhsad bixinta iyo isugu yeeridda kulanka Guddiga Wasaaradaha ee Qandaraasyada si loo dhameystiro hawlaha taagan. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxuu geedi socodka howlahaan ku taageerayaa siinta hagitaan istiraatiiji ah iyo ka talo bixin arrimaha u baahan in dib u eegis lagu sameeyo, taasi oo lagu taageerayo Guddiga Wasaaradaha ee Qandaraasyada oo dhamaystiraya Heshiiska Waxsoosaar Wadaaga iyo borotokoolka qandaraaska.

Arrimaha Maaliyadda: Wasaaradda Maaliyadda ayaa kulanka uga warbixisay dadaallada Dowladda ee kordhinta dakhliga gudaha ee ka soo xarooda soo dhoofinta qaadka iyo canshuuraha shirkadaha isgaarsiinta. Shirka ayaa sidoo kale looga hadlay horumarka laga sameeyay diyaarinta tartanka qandaraas lagu ururinayo deymaha ururay ee dakliga ka soo xarooda isticmaalka hawada Soomaaliya.

Heshiisyada iyo Qandaraasyada: Shirka waxaa looga hadlay heshiisyada iyo qandaraasyada Dowladda inta lagu jiro xilliga doorashooyinka. Shirka ayaa sidoo kale looga hadlay heshiisyo iyo qandaraasyo dhowr ah oo ay hore u gashay Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021: Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay biloowday howlaha diyaarinta qoraalka Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2021.